

## WAA MAXAY DARAASADA KHARASHKA DARYEELKA?

Daraasadani waxay ka soo ururin doontaa macluumaad dhaqaaale iyo barnamij daryeel-bixiyayaasha cunuga ee Washington si loo diyaariyo nidaam qiyas kharash. Nidaamkani wuxuu caawin doonaa in la fahmo intee inleeg oo lacag ah ayaa loo baahan yahay si loo bixiyo daryeel cunug oo tayo wanaagsan Washington. Daraasadu waxay fiirin doontaa saameynta liisanka iyo shuruudaha tayada iyo sidoo kake astaamaha kala duwan ee barnamijka si loo fahmo kala duwanaanshaha kharashka daryeelka.

Nidaamka kharashku waa u muhiim ogeysiinta siyaasada maalgalinta daryeelka cunuga ee mustaqbalka, oo ay ku jiraan heerka kabka daryeelka cunuga ee heer gobol iyo heerarka deegaanka. Wawa sidoo kale muhiima qiyasida maalgalinaha mustaqbalka ee loogu baahan yahay in lagu taageero nidaamka xoogan, kala duwan oo daryeelka cunuga ah oo dhalashada caruurta ilaa 12 sano jir ka ah. Daraasadani waxa loo isticmaali doonaa ka qeyb ahaan warbixinta sharci-dejinta ee Noofeembar 2022.

## WAA MAXAY SABABTA DARYEEL BIXIYAYAASHA CARUURTU UGA QEYBGALAYAAN?

Si loogu guulaysto daraasada kharasha daryeelka, in wax la galiyo ayaa looga baahan yahay qeybtan. Wawa daruuriya in aan ka ururino xogta kuwa qabanaaya shaqada si ay u caawiyaa siyaasad dejiyayaashu inay fahmaan waxay ku taagan tahay in la bixiyo daryeel cunug oo tayo sareeya, iyo intee inleeg ayaa khayraadka hadu daboolayaa dhanka kharashkaasi.

## MACLUUMAAD NOOCEE AH AYAA LA I WEYDIIN DOONAA INAAN SHEEGO?

Barnaamijyadu waxay leeyihin labo qaab oo looga qeybga-laayo daraasada:

1. Xog-ururin onlaayn ah. Wawa lagu weydiin doonaa inaad bixisid faahfaahinta khusaysa kharashaadka muhiimka ah, oo ay ku jiraan mushaharka, kabka, iyo hoyga (kirada ama iib-guri), iyo sidoo kale astaamaha barnamijka oo ay ku



jiraan dhinacyada shaqaalah (imisa qof ayaa ku jira shaqaalahaga), iyo da'da caruurta loo adeegay. Xog-ruruunta waxa lagu heli doonaa dhowr luuqadood wayna fuduhay in lagu helo moobil iyo aaladaha koomiyutarka. Waxaan rabnaa Inaan kasoo ururino macluumaadka adeeg-bixiyayaal badan intii macquula.

2. Wareysi onlaayna. Wawa lagu weydiin doonaa inaad bixisid faahfaahinta miisaaniyadaada, si si wanaagsan loogu fahmo kharashaadkaaga (biilasha) iyo dakhligaaga barnamijka daryeelka cunuga kasoo gala. Wareysigu wuxuu ururin doonaa macluumaadka ku aadan kharashaadka la xidhiidha heerarka tayada (Early Achievers [Guulaystayaasha Hore], NAEYC, iwm.) wuxuuna fursad siinaya in laga doodo kharashaadka la filaayo ee lagaga shaqeynaayo tayo sare.

Si loo ilaaliyo asturnaanta dhamaan macluumaadka lasoo ururiyey ee ay falan qeeyeen (Prenatal to Five Fiscal Strategies ) Siyaasadaha Sanadka ee Dhalmada ilaa Shanta. Kaliya macluumaadka la isku keenay ee lasoo koobay ayaa loola wadaagi doonaa ujeedada asaasida nidaamka kharashka.

## YAA HOGAAMINAAYA DARAASADAN?

The Washington Child Care Collaborative Task Force (Shaqaalahaa Hawsha Wadashaqeynta Daryeelka Cunuga Washington, oo ay weheliyaan Waaxda Ganacsiga, Waaxda Caruurta, Dhalinta iyo Qoysaska, Best Start for Kids ee Degmada King, iyo Waaxda Seattle ee Waxbarashada Barbaarinta iyo Tacliinta ayaa ka wada shaqeynaya daraasadan kharashka daryeelka.

Daraasadani waxa fuliyey (Prenatal to Five Fiscal Strategies ) Siyaasadaha Sanadka ee Dhalmada ilaa Shanta, oo ay hogaaminayaan Jeanna Capito iyo Simon Workman. Jeanna waa daryeel cunug bixiye hore oo leh khibrada u adeegista caruurta-yaray, socod baradka, iyo caruurta waaweyn iyadoo la maraayo qaab gaara oo aan faa'ido doon ahayn iyo barnamijyada Head Start iyo Early Head Start ay maalgaliyeen. Xirfada Simon waxay diirada saartay caawinta siyaasad dejiyayaasha si ay u fahmaan baahida korodhay ee maalgalinta dadweynaha ee dhanka daryeelka cunuga oo wuxuu sidoo kale yahay Gudoomiyaha Golaha barnamijka taakulada cunuga ee u adeegaya bulshooyinka haynta hooseeya caruurtooda iyo qoysaskooda.

Wawa intaas dheer, koox qoys ah, adeeg-bixiyayaasha xarunta iyo dugsiga ee gobolka ayaa la weydiiyey inay isku yimaadaan si ay u hagaan daraasada una bixiyaan fikir saxa oo haboon. Kuwa qabta shaqada waa inay joogaan xarunta daraasadan.

## FAAHFAAHINTA LAGALA XIDHIIDHAYO

Prenatal to Five Fiscal Strategies

[info@prenatal5fiscal.org](mailto:info@prenatal5fiscal.org)

[www.prenatal5fiscal.org](http://www.prenatal5fiscal.org)

**Hogaanka Daraasada**

Simon Workman, [simon@prenatal5fiscal.org](mailto:simon@prenatal5fiscal.org)

Jeanna Capito, [jeanna@prenatal5fiscal.org](mailto:jeanna@prenatal5fiscal.org)